

## Shaqo ku qorida ku salaysan gogoldhigga xirfadda

Haddii da'daada ay 25 sano ka hooseeyso, aadan lahayn wax xirfad ah oona shaqo la'aan ahayd mudo ugu yaraan ka kooban saddex bilood, waxad baran kartaa xirfad adigoo isla markaas qadanaayo mushahar. Xaaladaas loo shaqeeyaha ayaa mas'uul ka ah hogaamintaada ama in uu tababar ku siiyo, waxaana lagu siin doonaa kaalmo-dhaqaaleed.

### Xaq ma ku leeyahay shaqo ku qorida ku salaysan gogoldhigga xirfadda?

Haddii aad 15 sano buuxsatay laakinse weli aadan buuxsan 25 sano, waxaa heli kartaa shaqo ku qorida ku salaysan gogoldhigga xirfadda waa haddii aad buuxin karto mid kamid ah shuruudaha hoos ku xusan:

- xirfad khibrad uma lihid
- mudo ka kooban afar bilood ayaa laga doonayaa inaad shaqo la'aan ahayd, oona ugu yaraan 90 maalmood ku qornayd Xafiiska Shaqada.

Haddii isla loo shaqeeyaha aad imminka u shaqayso u shaqada cusub kugu qori doono, waa in shaqada cusub ay tahay mid xirfad cusub ku salaysan. Warbixin dheeraad waxaad kala xiriiri kartaa loo shaqeeyaha ama Xafiiska Shaqada.

### Immisa ayaa lay siin doonaa?

Waxaa lagu siin doonaa mushahar u dhigma ugu yaraan boqolkiiba 75 mushaharka ku salaysan heshiiska dhexmara ururrada loo shaqeeyaha iyo ururrada shaqaalaha, kaasoo hadba ku salaysan tirada saacadaha shaqada ee hogaaminta iyo tababarka.

### Soo caymis ma lihi?

Waxaad xaq ku leedahay caymiska ku salaysan heshiiska dhexmara ururrada loo shaqeeyaha iyo ururrada shaqaalaha ee goobta shaqada.

## **Noocyada shaqo ku qorida ee aan gunnada ku heli karo waa kuwee?**

Waa in shaqo ku qorida ay ku salaysan tahay gogoldhigga xirfadda, waxayna noqon kartaa saacada shaqo aan qabyo ahayn ama qabyo ah.

## **Loo shaqeeyeyaasha magdhawga la siin karo waa kuwee?**

Loo shaqeeyaha waa in uu galay heshiiska dhexmara ururrada loo shaqeeyaha iyo ururrada shaqaalaha oo heer dhexe ah, kaasoo xiriir la leh gogoldhigga xirfada ama heshiiska dhexmara ururrada loo shaqeeyaha iyo ururrada shaqaalaha oo heer maxali ah, kaasoo xiriir la leh gogoldhigga xirfada. Heshiisyada way kala duwanaan karaan hadba laanta ganacsiga ay arrinta khuseeyso. Taasoo shuruudo ku saabsan da'da iyo waxbarashada dugsiyada sare ee kala duwan lahaan karto. Mararka qaarkood waxaa qofka lagu shurdayn karaa in u jiro heshiis maxali ah ku saabsan gogoldhigga xirfada oo dhexmada loo shaqeeyaha iyo ururka shaqaalaha ee maxaliga ah. Teeda kale, waa in loo shaqeeyaha uu iska diiwan geliyay diiwanka loo shaqeeyeyaasha ee Hey'adda Canshuuraha una ku siin karo hogaamin ama tababar u dhigma ugu yaraan boqolkiiba 15.

## **Immisa loo shaqeeyaha magdhaw ahaan loo siiyaa?**

Loo shaqeeyaha waxaa la siiyaa magdhaw u dhigma canshurta mushaharka ee u bixiyo loo shaqeeyaha oo ah boqolkiiba 31,42. Teeda kale, waxaa loo shaqeeyaha la siinayaa magdhowga hogaaminta oo ah 115 karoon/maalintii ku salaysan saacadaha shaqada aan qabyada ahayn.

## **Mudada shaqo ku qorida ee layga doonaayo waa intee?**

Mudada shaqo ku qorida waa in aysan ka yarayn lex bilood.

## **Mudada loo shaqeeyaha la siin karo magdhawga waa intee?**

Loo shaqeeyaha wuxuu magdhawga qaadan karaa ugu badnaantii laba iyo tobban bilood.

## **Sidee ba mas'uuliyada loo qaybsaday?**

Adiga iyo loo shaqeeyaha waxaa wadajir u diyaarinaysaan qoraalka qorsheha hawlgalka ama qoraalka qorsheha waxbarashada. Kaddib wuxuu loo shaqeeyaha taageero ka codsanayaa Xafiiska Shaqada, wuxuuna codsiga ku soo lifaaqayaa qoraalka qorsheha hawlgalka ama qoraalka qorsheha waxbarashada. Shaqo ku qorida ma hirgeli karto haddii Xafiiska Shaqada usan codsiga helin.

Haddii weli aadan iska diiwan gelin Xafiiska Shaqada, waa inaad Xafiiska Shaqada la xiiriirta oo aad iska diiwan gelisaa.

## **Nidaamyada**

Xeer-maamuleedka (2013:1157) taageerada Shaqo ku qorida ku salaysan gogoldhigga xirfadda.

Nagala soo xiriir 0771-416 416 haddii arrintaan aad xiisaynayso ama aad doonayso warbixin dheeraad ah. Waxaad kaloo booqan kartaa Xafiiska Shaqada kugu dhow ama shabakadda internetka [arbetsformedlingen.se](http://arbetsformedlingen.se).